TIKNOOLAJIYAD

ADVANCED METERING

Awood badan oo Gacmahaaga ku jirta

Seattle City Light waa adeega ugu cagaaran/wanaagsan wadanka. Waxaa naga go'an inaan ku siino adeega ugu wanaagsan shirkada iyo isku halayn halka oo aan awood siinayno inaad samayso doorashooyin tamarta lagu kaydinayo. Iyadoo qayb ka ah ballan qaadkan, waxaan qorshaynay inaan bilowno beddelisa mitirada korontada ku badalno cabirka hormarsan ee 2017.

SIDA ADVANCED METERING USHAQEEYO

Cabirkaaga hormarsan waxaa lagu xiri doonaa gurigaaga ama ganacsiga oo uu soo aruurin doonaa macluumaadka isticmaalkaaga korontada. Cabirku wuxuu isgaarsiin toos ah siin doonaa mitirka iyo shirkada. Taa macnaheedu waa:

- Cabirka hormarsan wuxuu diiwaaniyaa macluumaadka isticmaalka korontada ee macmiilka maalinta oo dhan, sida cabirada mitirada ay sameeyaan maanta.
- Dhowr jeer ayaa maalintii xogta isticmaalka korontada macmiilka loo diraa City Light ayadoo la isticmaalayo mowjadaha raadyada. Tani waxay la mid tahay xiriirka tooska ah ee ay isticmaalaan taleefanka iyo internedka aan waayarka ahayn. (Wi-Fi) Cabirka wuxuu gudbin doonaa xogta ugu badnaan 90 mirir maalinkii.
- Marka xogtu ay gasho kaydka amaanka ah ee City Light, xogta isticmaalka korontada waxaa lagu aadin doonaa kootada macmiilka si loo xisaabiyo iyo adeegyada kale ee macmiilka, lamid ah qiimahii caadiga ahaa ee cabirka.

IS BARBARDHIGIDA MITIRKA HORMARSAN IYO MITIRKA HADDA

Uguurida cabirka hormarsan waa sida cusboonaysiin yar oo kale sida ayadoo taleefanada casriga ah loo guuray oo laga guuray laynlaynkii - labada tiknoolajiba way shaqeeyaan, laakiin taleefanka casriga ah ayaa u khibrad wanaagsan isticmaalaha oo u ogolaanaya inuu qofku ku xirnaado waxyaabaha uu danaynayo.

Advanced Metering, waxaad heli kartaa macluumaadkaaga isticmaalka korontada. Waxaad awood uyeelan doontaa inaad aragto inta koronto aad isticmaashay mar kasta oo aad ubaahato intaad sugi lahayd in warqada korontada laguu keeno, iyadoo kuu awood siinaysa inaad go'aanada kaydinaya korontada qaadato.

Mitiradeena korontada ee hada jira waxaa loo baahanyhay in akhriyayaasha mitirka ay gurigaaga soo booqdaan iyo ganacsiga si ay gacanta ugu qoraan macluumaadka koronta labadii bilood oo kastaba mar. Isku duwida akhrinta mitirka aan sida tooska ahyn loo akhriyo waxay mararka qaar ubaahantahy in kharashaadka korontada lagu saleeyo qiyaas. Cabirka Hormarsan wuxuu si wayn u yareeyaa baahida booqashada joogtada ah looga baahanyahay mitir akhriyayaasha, oo wuxuu macluumadka kharashka u bixin doonaa si sax ah oo wakhtiyaysan.

Seatle waa hiigsadaha hiigsade, tiknoolajiyad sare leh, Waaan muhiim inaan la socono baahideeda sida baaxada wayn u koraysa ee tamarka iyo inaan bixino adeeg hufan si aan ula kulano koritaankeeda.

MEELAHA LAGALA XARIIRO BARNAAMIJKA:
IIMAYL: SCL_Advanced_Metering@seattle.gov
WEB: seattle.gov/light/meters
TALEFOONKA: (206) 727-8777

Seattle City Light

Maarso 2016

QIYAASTA RAKIBIDA CABIRKA HORMARSAN EE GUDAHA US SANADKA 2015



Source: Institute for Electric Innovation, 2014

CONNECTING THE COUNTRY

More than **500** US electric utilities have installed advanced meters

More than **50** million advanced meters installed

About **43%** of US homes have Advanced Metering

Nearly **90%** of advanced meters are on residential homes

NIDAAM IN BADAN HUFAN

Mustaqbalka, Advanced Metering wuxuu awood uyeelan doonaa inuu sheego inta ay la egtahay korontada la isticmaalay iyo meesha ay usocoto. Tani waxay inaga caawin doontaa inaan si wanaagsan u fahano qaybiyada korontada iyo inaan si hufan u maarayno nidaamka qaybiya korontada.

La isku halayn karo, awood koronto oo qiima jaban, loo soo gudbiyo qaab jawi saaxiibtinimo leh ayaa ahaa haddafka City Light ilaa 110 sanadood. Cabirka Hormarsan wuxuu bixin doonaaqalabka qarniga 21aad si loo gaaro goolkaas.

ASAL RAACA BARJNAAMIJKA

Sida ku qeexan qorshaheena istraatiijiga ah, Seattle City Light waxay ku badali doontaa in ka badan 410,000 mitirada korontada kuwa cabirka hormarsan. Advanced Metering waa mid kamid ah hindisaha dhowrka istaraatiiji ee lagu dhisayo smarter grid oo faa'iido u leh macaamiisheena. Waxay casriyayn doontaa howlagalada City Light, hormarin doontaa adeegyada aan siino macaamiishena oo ay taageeri doontaa dadaalkeena lagu joogtaynayo shirkada ugu cagaaran wadankeena. Rakibida mitirku waxay qorshaysantahy inay bilaabato 2017.

THE NATION'S GREENEST UTILITY · SINCE 1905 · SEATTLE CITY LIGHT

Seattle City Light waxaa ka go'an in ay xad dhaafiso rajooyinka macaamiishayada oo soo saarto oo gudbiso degaan ahaan mid masuuliyad leh, badbaado leh, qiimo jaban iyo koronto la isku halayn karo.

Maarso 2016